# Aqoonsiga iyo Adeegga
# Carruurta LEH HIBADA

## HIBADA & TAYADA

(614) 365-6626
(614) 365-8605

Revised November 2018

**CADAYNTA & UJEEDADA HIBADA TAYADA**

Aqoonso kuna barbaari aqoonyahannada hibada leh iyada oo loo marayo adeegyo joogto ah oo loogu gudbiyo si habboon iyo jawi waxbarasho oo adag iyadoo kor looqaadayo qof ahaanta si ay u kobciyaan hal-abuurka, hoggaaminta, iyo dareen bulsho-caafimaad qab ah.

**Aragga**

Diirad adag, khibradaha waxbarasho ee ardayga ku salaysan iyo taageerooyinka dareen-bulsho ee ay bixiyaan kooxo wada shaqeyn leh.

*****************************************************************************************************

*Hawlgalka: Arday kastaaba wuxuu leeyahay aqoon heer sare ah, una diyaarsan yahay hoggaaminta iyo adeegga, iyo inuu awood u leeyahay guusha muwaadiniin ahaan bulshada caalamka.*

***Qeexitaan***

"Hibo" waxaa loola jeedaa ardayda kuwaas oo soo bandhiga ama muujiya karti ay ku guuleystaan heerar sarreeya oo dhammeystiran marka la barbar-dhigo kuwa kale ee da'dooda ah, waayo-aragnimadooda, ama deegaankooda, iyo kuwa lagu aqoonsaday marka loo kala qaybiyo (A), (B), (C), ama (D) qaybta 3324.03 ee Xeerka Dib ugeegista Ohio.

***Baaritaanka iyo Qiimeynta***

- *Baadhitaanka Dhammaan Fasalka- Ardayda ku jirta K-8 waxaa lagu baari doonaa akhriska iyo xisaabta 2-3 jeer sannadkii.* Ogeysiiska aqoonsiga hibo cusub ayaa dhici doona bisha Noofeembar, Febraayo, iyo Maajo. Ardayda fasalka 2aad iyo fasalka 5aad ayaa la imtixaanaa bisha Noofeembar si ay u kormeeraan awoodda garashada sare iyo kartida fikirka hal-abuurka. Dhibcaha waxaa badanaa loo diraa guriga bisha Febraayo.
- *Imtixaanka Beddelka ah - Arday kasta oo ku jira Fasalada K-12aad waxaa loo gudbin karaa imtixaan ka sareeya garashada,* tacliin gaar ah, ama awoodda fikirka hal-abuurka illaa 2bo fursadood sanadkii si loo imtixaano (oo ay ku jiraan baadhitaanada fasalka oo dhan). Waraaqaha gudbinta iyo waqtiyada kama dambaysta ah waa internetka oo laga heli karo xafiiska Hibada & Tayada (Gifted & Talented). Dhibcaha waxaa lagu soo dirayaa guriga 4 toddobaad gudahood qaadista imtixaanka.
- *Muuqaalka iyo Qiimaynta Bandhig* Faneedka Farshaxanka Tiyaatarka- *Nidaamka qiimeynta ee Muuqaal* iyo Bandhig Faneedka Farshaxanka Tiyaatarka waa qaab geedi-socod oo ku dhaca laba wareeg: mid waa dayrta kan-kalana waa Qaboobaha /gu'ga. Oggolaanshaha Waalidka waxaa la helaa wax yar ka dib marka dariishaduhu ay xiraan macalimiintu dhameystiraan liiska jadwalka bisha Oktoobar / Febraayo ardayda xaqa u lehna ay dhammaystiraan geeddi-socodka codkooda ama soo bandhigidoona tayada bisha Noofeeembar / Maarso.

***Bedelka Ardeyda***

Aqoonsiga hibada leh ee dugsi kale oo ah degmada Ohio waxaa lagu aqoonsanayaa Dugsiyada Magaalada Columbus. Qoysasku waa inay keenaan caddaynta aqoonsiga iyadoo loo marayo warqad ka timid degmadii hore ama dokumentiyo kale. Ardayda loo aqoonsaday inay yihiin kuwo hibo leh oo ka baxsan degmada Ohio waxaa laga yaabaa in lagu aqoonsado Ohio haddii imtixaanaadkii laga qaaday ay yihiin kuwo kahooseeya 24 bilood kahor kuna jiraan diiwaanka Waaxda Waxbarashada Ohio ee liiska ansixinta. Haddii imtixaanku aanu buuxin shuruudahaas, ardayga waxaa laga yaabaa in loo diro imtixaan muddo 90 cisho gudahood ah laga bilaabo marka waalidka diiwaangeliyo codsiga.

***Nidaamka Rafcaanka***

Haddii walaac yimaado, Qoysasku waa inay la xiriiraan Agaasimaha Hibada iyo Tayada. Si kastaba ha ahaatee, haddii aysan ka jawaabin dareenka, natiijooyinka rafcaannada waa in loo gudbiyaa qoraal ahaan 30 maalmood gudahood laga bilaabo ogeysiinta natiijooyinka imtixaanka. Rafcaannada waa in loo diraa Agaasimaha Fulinta, Office of Teaching and Learning, 3700 S. High St., Columbus, Ohio 43207. Agaasimaha Fulinta ee Barashada iyo Barbaarinta wuxuu soo saari doontaa go'aan kama dambeys ah oo qoraal ah 30 cisho gudahood mudada rafcaanku socdo.

# Qalabka Qiimaynta ee Degmada uu isticmaalo Aqoonsiga Hibada

Degmadu waxay isticmaashaa qalabka qiimeynta gobolka ee ansixinta baaritaanka iyo aqoonsiga. Qalabka lagu xushay wuxuu ku xiran yahay aagga si loo qiimeeyo Sargooynta dhibcaha wayna kala duwan yihiin qalab ahaan laakiin waxaa go'aamiya Waaxda Waxbarashada ee Ohio si waafaqsan dhanka shuruudaha ee Xeerka Dib u Eegista Ohio. Faylka oo dhan oo ah qalabka la ansixiyey, booqo bogga Waaxda Waxbarashada ee Ohio. Wixii faah-faahin dheeri ah ee imtixaannada ay sameeyeen Dugsiyada Magaalada Columbus, fadlan la xiriir qaybta Hibada & Tayada.

# Noocyada Adeegyada Hibada

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay xaqiijineysaa fursado loo siman yahay dhammaan ardayda degmada ee loo aqoonsaday inay yihiin kuwo hibo leh si ay u helaan adeegyada ku haboon ee degmada.

***Qorshooyinka Waxbarashada Qoraalka***

Ardayda qaata adeegyada hibada waxay u baahan yihiin Qorshaha Waxbarashada Qoraalka (WEP). Ujeedada WEP waa in ay wada xiriiraan khabiiro hibo leh, macalimiinta fasalka iyo waalidiinta wixii ku saabsan adeega hibada leh ee cunuggu helo. Adeega hibada leh waa inay ahaadaan kuwo udhigma heerka (heerarka) aqoonsiga ilmaha. WEPs waxay diyaar u yihiin dib-u-eegista iyo talooyinka waalidka inta lagu guda jiro kulanka Waalidka-Macalinka ee xilliga dayrta iyo guga.

***Ka laabashada***

Haddii ardayga uu rabo in laga saaro barnaamijyada hibada leh ama adeegyada, codsi qoraal ah waa lagama maarmaan. Tani waxay dhalin doontaa geedi socodka oo ay ka mid yihiin shir lala yeesho macallinka, fulinta qorshaha dhexdhexaadinta, shir dabagal ah, ka dibna go'aanka ku saabsan ka noqoshada. Codsiga waa in uu saxiixo waalidka oo lagu hagaajiyaa Agaasimaha Hibada iyo Tayada. Adeeggu wuu sii socon doonaa haddii uusan agaasimuhu helin ogeysiis qoran oo waalid ah.

***Columbus Gifted Academy***

Ardayda fasalada 3aad illaa 8aad waxay ku qoran yihiin xaafadooda dugsiyada ka tirsan laakiin waxay dhiganayaan fasalka oo dhan maalin kasta ee Columbus Gifted Academy. Ardayda waa in loo aqoonsadaa inay yihiin kuwo hibo leh awoodda garashada sare ama labadaba akhriska iyo xisaabta si ay ugaqeyb qaataan barnaamijyadan. Gaadiidka way helayaan si waafaqsan sharciyada gaadiidka degmada.

***Arts Impact Middle School/Fort Hayes Arts & Academic High School***

Ardayda loo aqoonsaday inay yihiin kuwo hibo aragiyeed leh ama bandhig faneed farshaxan kuwaas oo ka qeyb galaya Arts Impact Middle School ama Fort Hayes High School waxay kahelayaan barnaamijka barashada farshaxanka maalinlaha ah.

Ardaydu waxay kaloo heli karaan koorsooyin farshaxan oo gaar ah oo ay barayaan macallimiin aqoon sare uleh farshaxanka.

***Fursadaha Dugsiyada Hoose***

*Akhriska & Xisaabta Hibada*

Xulo dugsiyada hoose eel eh hibada akhriska iyo fasalada xisaabta ee fasalada 3-5 oo ay barayaan barayaal leh shatiga hibada gaarka ah. Ardayda loo aqoonsaday inay yihiin kuwo uleh hibo maaddadaas ama fikirka hal-abuurka leh ee dhibcaha 85aad ama ka sareeya imtixaankii ugu dambeeyey ee qaranka ee maaddadaas ayaa ka qaybgali kara. Gaadiidka way helayaan dhismooyinkan iyadoo loo eegayo xeerarka gaadiidka degmada.

*Taageerada Hibada ee Luqadda ee Dugsiyaga Gaarka ah*

Ardayda loo aqoonsaday inay yihiin kuwa hibada leh awoodda garashada sare ee fasalada 3-6 waxay la kulmi doonaan khubaro hibo gaara leh 225 daqiiqo toddobaadkii fasalada caadiga ah ee Ecole Kenwood French Immersion School iyo Columbus Spanish Immersion Academy.

***Fursadaha Dugsiyada Dhexe***

*Akhriska & Xisaabta Hibada*

Xulo dugsiyada dhexe ood kaheli karto koox hibo leh fasalada akhriska iyo xisaabta ee fasalada 6-8 oo ay dhigaan macallimiin kooban oo leh khibrad hibo oo gaara oo yimaada waqtiyo kooban. Ardayda loo aqoonsaday inay yihiin kuwo hibo uleh maaddadaas ama fikrado hal abuur leh oo gaaraya 85 dhibcood boqolkiiba ama ka sareeya imtixaankii ugu dambeeyay ee qaranka ee maaddadaas ayaa ka qayb qaadan kara. Gaadiidka way helayaan dhismooyinkan iyadoo loo eegayo xeerarka gaadiidka degmada.

***Fursadaha Dugsiyada Sare***

*Meelaynta Sare (AP) & Shahaadada Caalamiga ah ee Baccalaureate (IB)*

Dugsiyada ku yaal degmada waxay bixiyaan koorsooyin Meeleyn sare ah. Qaybta Hibada iyo Tayada leh waxay isku dubaridaa u hoggaansanaanta sharciyada Guddiga Kulliyadda ee koorsooyinkan. Ardaydu waxay kasban karaan dhibcaha kuliyadaa iyadoo ay udheertahay natiijada imtixaannada fasalada guga. Koorsooyinka heerarka kuliyada IB iyo darajada iyo Dibloomada IB ayaa laga bixiyaa Columbus Alternative HS.

*College Credit Plus*

Ardaydu waxay codsan karaan inay qaataan koorsooyinka kuleejka jaamacadaha dalka inta ay ku jiraan dugsiga sare. Fadlan la xiriir lataliyahaaga hanuuninta si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

*Credit Flexibility*

Ardayda dugsiga sare waxay kasban karaan dhibcaha casharrada dugsiga sare iyadoo loo marayo habab kale, sida daraasad madaxbannaan, koorsooyin dibadeed, barnaamijyada barashada internetka, ama imtixaanka kooraska. Fadlan booqo lataliyahaga hagaha ama bogga internatka dhibcaha adag ee degmada wixii faahfaahin dheeraad ah.

# Fursadaha kale ee Ardayda

***Dardargelinta Waxbarashada***
Ardayda si aadka ah ugu horumarsan hal ama dhowr maado waxaa loo gudbin karaa dardargelinta heerka xiga ee maadada gaar ah ama heerka fasalka xiga.ee guud gudbinta waa in la sameeyaa ugu yaraan 60 maalmood ka hor bilowga simistarka. Meelaynta ardayga ayaa lagu go'aamin doonaa iyada oo la raacayo siyaasadda dardargelinta degmada.

***Barnaamijka Xirfadaha Maskaxda ee Horumarinta Asaasiga ah***
Khabiirada kobcinta aasaasiga ah waxay baraan casharrada ku saabsan xirfadaha fekerka fasalada oo idil iyo kooxo yar oo ardayda ah. Tani waa barnaamij tijaabo ah oo 38 dugsi hoose ah oo loogu talagalay ardayda K-2 ee dugsiyada la soo xulay.

***Fursadaha Kobcinta***
Tusaalooyinka fursadaha kobcinta badani waa shax-miiseed, Hindisaha Wada hadalka, Xisaabta, iyo doodda. Maamulayaasha waxaa loosheegay soo kala xulashooyinkan iyo la shaqeeynta shaqaalaha si ay u sameeyaan kala doorashada xulashada ee ardayda loo heli karo.

***Fursadaha Kulaylaha***
Liiska bilowga ah ee fursadaha Jiilaalka (Kulaylaha) waxaa laga heli karaa bogga internetka ee Hibada & Tayada ee www.ccsoh.us. Deeqaha waxbarasho waxaa heli karaa qoysaska u qalma iyada oo loo marayo Taageerada Ardayda Hibada leh ee www.supportfortalentedstudents.org iyo Ururka Ohio ee loogu talagalay carruurta Hibada leh ee www.oagc.com.

***P.A.C.E.***
PACE waa urur loogu talagalay qoysaska ardayda hibada leh ee Columbus waxayna kulmaan bishiiba mar. Macluumaadka, booqo www.columbuspace.org ama bogooda Facebook.